Xeerka dhaqanka ilaalinta carruurta oo luuqad fudud ku qoran[1]

Diakonie waxay rabtaa in dhammaan rabshadaha/tacadiyada carruurta laga ilaaliyo. Taasi waa sababta ay Diakonie ugu jirto siyaasadda ilaalinta carruurta. Carruurta waxaa kale oo ku jira kurayda iyo dhallinyarada ilaa 24 jir-ka ah.

Diakonie waxay rabtaa shaqaale kasta inuu ka ilaaliyo carruurta rabshadaha ama tacadiyada. Looma kala eegayo hadday tahay shaqada ama wakhtiga firaaqada. Taasi waa sababta uu shaqaale kastaa u saxeexo xeerka anshaxa.

Marka aan saxiixo xeerka anshaxa, waxaan isku xilqaamayaa inaan carruurta ka ilaaliyo rabshadaha.

Xeerkan anshaxa ayaa dhigaya:

• Sida saxda ah ee loola dhaqmo carruurta.

• Maxaa dhacaya haddii qof uusan si habboon ula dhaqmin carruurta.

Sideen si sax ah ul dhaqmikaraa carruurta?

Waxaan jeclaan lahaa inaan shaqadayda ku kordhiyo in:

• Carruurtu in ay dareemaan ammaan.

• Carruurta waa in si dhab ah ayaa loo rumeystaa.

• Carruurta waa in la ixtiraamaa.

Waxaan rabaa inaan carruurta ula dhaqmo si qaddarin, ixtiraam iyo kalsooni leh.
Waan ogahay inaan tusaale u ahay carruurta. Carruurtu waa inay iga bartaan sida loola macaamilo dadka kale.
Waan ogahay in khaladaad dhici karaan markaan carruurta ag joogo. Marka aan khalad sameeyo, waan ka hadlayaa. Marka khaladaad iga dhacaan, si cad ayaan ula macaamilayaa. Marka aan khalad sameeyo, waxaan raadsanayaa caawimo. Tusaale ahaan xarunta la-talinta.
Waxa jira afar mabaadi'da aasaasiga ah ee ku jira Axdiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Carruurta:

[1]Xeerka anshaxa ee luqadda fudud wuxuu u adeegaa si uu u wanaajiyo fahamka iyo inuu jebiyo caqabadaha iyo dhibaatooyinka luuqadda. Noocani hadda kuma xirna, laakiin ujeedadu waa in loo isticmaalo sida nuqulka keliya ee si rasmi ah loo saxeexo mustaqbalka. Sababtan awgeed, noocaan waxaa loo adeegsadaa aasaaska tarjumaada.

- Xaq u lahaashaha in si siman loola dhaqmo: Ubadka lama liidi karo, waddankay doonaan ha ka yimaadaane, midabka maqaarka ilmuhu leeyahay, diinta uu ilmuhu haysto, hadday naafo yihiin ama hadday wiil iyo gabar yihiinba.
- Mudnaanta wanaaga ubadka: Go'aan kasta, waa in laga fiirsado saamaynta uu go'aanku ku yeelan doono carruurta. Carruurta waa in had iyo jeer la ilaaliyo.
- Xaqa nolosha iyo horumarka shakhsi ahaaneed: Xaqa nolosha iyo horumarka shakhsi ahaaneed macnaheedu waa in ilmo kasta laga ilaaliyo gaajo, faqri iyo cudur. Ilmo kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu noolaado. Dhammaan carruurtu waa inay awoodaan inay noolaadan, koraan oo si fiican u koraan.
- Ixtiraam ra'yiga ilmaha: Dhammaan carruurta waa in si dhab ah loo qaddariyo oo la ixtiraamaa. Carruurtu waa inay ku lug yeeshaan go'aamada.

Waxaan rabaa in aan u dhaqmo sida uu qabo Axdiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Carruurta.

Waan ogahay inay jiraan sharciyo ilaaliya carruurta. Waa inaan adeecaa sharciyadan. Diakonie waxay leedahay siyaasadda ilaalinta carruurta. Dardaaranka Ilaalinta Ilmaha wuxuu rabaa in carruurta laga ilaaliyo tacadiyada.

Waxaan ballan qaadayaa inaan u hoggaansamo qodobbada soo socda:

1. Waxaan ixtiraamayaa xuquuqda carruurta. Waxaan ixtiraamkayga ku muujinayaa xuquuqda carruurta hab-dhaqankayga.
2. **Waxaan sameyn doonaa wax walba si aan carruurta uga ilaaliyo tacadiyada.**

Tacadiyadu waxay noqon karaan:

- Dayaca: Dayacaadu waxay la macno tahay in ilmuhu aanu helin waxa isaga ama iyada ay u baahan yihiin si uu u noolaado. Tusaale ahaan, cunto, daryeel shakhsi, dhar, waxbarasho, badbaado iyo jacayl.
- Xadgudub jireed iyo mid maskaxeed/nafsiyadeed: Xadgudub nafsiyeed waxaa ka mid ah, tusaale ahaan, cay, jeesjees, hanjabaad, aflagaado. Xadgudubka jireed waxaa ka mid ah garaacid, ruxid, qaniinyo iwm.
- Xadgudub galmo iyo tacadi jinsi: Xadgudub galmo ama tacadi jinsi waa, tusaale ahaan, marka qof u salaaxo ilmo meel ay dhibsanayaan ama isku dayaan inay dhunkadaan ilmaha iyagoon raali ka ahayn, ama marka qofku ka taabto ilmo meelaha qaaska ah.
- **Ka faa'iidaysi**: ka faa'iidaysigu waa marka uu qof lacag ka sameeyo ku shaqeysiga carruurta ama ku xadgudbo.

Waa ii caddahay in aan carruurta ka ilaalinayo tacadiyada. Had iyo jeer waxaan carruurta ka ilaalinayaa tacadiyada ama rabshadaha, hadday shaqada joogaan ama wakhtigooda firaaqada ah.

Haddii ay tacadiyada carruurta ka dhanka ah tahay, waxaa loo yaqaan khatargelinta ilmaha.
Wax kasta oo khatar ku ah carruurta waa in la soo sheegaa.
Wax kasta oo khatar ku ah bad-qabka carruurta ee diakonie waa in lagu wargeliyaa ilaalinta carruurta. Diakonie waxay haysataa liis kuwa masuulka ka aha ilaalinta carruurta.

Maxay yihiin tusaalayaasha ku saabsan khatarta ilmaha?

a. Ilmaha looma ogola in la seexiyo ciqaab ahaan.
b. Qofka oo aan ka fogaan ilmaha masaafo ku filan, iyadoo ilmuhu aanu rabin ama dareemayo raaxo daro u dhawaashaha darteed.
c. Qofka oo awoodiisa u isticmaalaya carruurta. Tusaale ahaan, marka qof ku qanciyo ilmaha inuu yeesho fikrad gaar ah ama marka qof ku qasbo ilmaha inuu sameeyo wax aanu raali ka ahayn sameyntooda.
d. Lama ogola in Ilmaha wax uu cuno ama cabbo loogu diido ciqaab ahaan.
e. Qofka oo aan ilaalineyn ilmaha.
f. Qofka oo sawir ka qaada ilmuhu markuu qaawan yahay.
g. Qofka oo cadaadis saara ilmaha inuu sameeyo wax gaar ah.
h. Qofka oo si xun ama si xaasidnimo ah uga hadla ilmaha. Qofka oo xira ilmaha. Qofka oo ilmaha cabsi geliya.
i. Qofka oo garaaca ilmaha.
j. Qofka oo ku carooda ilamaha. Tusaale ahaan, ilmaha oo la riixo, la hantaatureeyo, la ruxo, ilmaha oo si xoog ah loo qabto/la xajiyo.
k. Qofka oo dhunkada, salaaxa, ama ka taabtay ilmaha meelaha gaarka ah.
l. Qofka oo canuga aflagaadeeya.

3. Waxaan doonayaa:
- In aanan ku tacadin ama ula hadlin si xun carruurta.
- In aanan yasin carruurta, si xunna uga hadlin carruurta.
- In aan loola dhaqmin carruurta si xun ama uga hadlin, sababtoo ah midabka maqaarkooda ama asalkooda.
- In aanan ku takri falin carruurta una adeegsan awoodayda qof weyn ahaan
- Ha ula dhaqmin carruurta si xun ama si xun ha uga hadlin carruurta sababtoo ah ilmuhu waa wiil ama gabar.
- Waxaa kaloo iga go'an inaan hubiyo inaan qof kale si xun ula dhaqmin carruurta.

4. Waxaa muhiim u ah Diakonie in ilmo kasta loo arko shakhsiyad madax-bannaan. Diakonie waxay shaqaalaheeda ka rajaynaysaa ixtiraamka carruurta. Waxaan u arkaa ilmo kasta inuu yahay shakhsiyad madaxbannaan. **Waxaan u dhaqmaa si ixtiraam leh xagga carruurta.**

Tusaalayaal noocee ah ayaa jira dhaqanka ixtiraamka leh ee carruurta?

a. Waxaan u hadlayaa si ay caruurtu ii fahmaan oo ay ilmuhu dareemaan in si dhab ah loo arko.
b. Waxaan u sharaxayaa carruurta sababta aan ula xiriirayo iyaga. Waxaan u sharxayaa carruurta habraacyada iyo u jeedka.
c. Waxaan u sharraxayaa carruurta go'aammadayda. Carruurtu maaha inay iga rumaystaan wax kasta oo aan sheego iyada oo aan sharraxaad laga bixin.
d. Si taxadar leh ayaan u dhegeysanayaa carruurta oo aan uga jawaabaa dareenkooda.
e. Waxaan taageerayaa carruurta si ilmo kasta u sameeyo inta ugu badan ee suurtogalka ah si madax-bannaan.
f. Waxaan siinayaa carruurta fursado badan oo ay wax ku sheegaan.
g. Haddii qof uusan ixtiraamin xuduudaha ilmaha, waan ka hadlayaa.
h. Waxaan isweydiiyaa inaan ahay qof ku dayasho wanaagsan.
i. Waxaan barayaa carruurta sida wanaagsan ee loo isticmaalo taleefoonnada gacanta. Waxaan rabaa in carruurtu ay taxaddaraan marka ay isticmaalayaan baraha bulshada, sida Facebook ama TikTok. Qofna waa in aan la dhaawacin, la aflagaadeyn ama laga saarin fariimaha, sawiro ama muuqaalo, ha ahaato Facebook ama WhatsApp, tusaale ahaan.
j. Carruurtu waa inay ogaadaan haddii aan qaraabo nahay ama aan saaxiib la ahay qof shaqada jooga.
k. Aad ayaan ugu fiirsanayaa inta u dhawaanshaha iyo fogaanta ilmuhu rabo.
l. Waxaan weydiinayaa carruurta haddii ay rabaan caawimaad iyo cidda caawinaysa.
m. Ka hor intaanan ilmaha taageerin ama aan soo dhexgelin xaaladaha, waxaan si dhow ula soconayaa ilmaha.
n. Marka aan ka hadlo ama wax ka qoro carruurta, waxaan isku dayaa in aan tuso sida ay u kala duwan yihiin, in ilmo kastaa uu yahay shakhsiyaddiisa, ilmo kastaana uu leeyahay karti iyo astaamo u gaar ah.
o. Waxaan rabaa in la ilaaliyo meelaha gaarka ah ee carruurta iyo in qof kastaa ixtiraamo meelaha qaaska ah ee carruurta. Meesha qaaska ama gaarka ah waa aagga qofku uu naftiisa oo keliya taaban karo. Tusaale ahaan jirka.
p. Waxaan taageerayaa carruurta marka ilmuhu aanay iskood u xallin karin khilaafka.
q. Wax kasta oo aan sameeyo, waxaan fiiro gaar ah u yeelanayaa waxa ilmuhu rabo.
r. Markaan hadlayo, waxaan indhaha ka eegayaa ilmaha.
s. Waxaan u sharaxayaa carruurta xeerarka guud iyo xuduudaha.
t. …

5. Aad ayaan uga taxadarayaa inta u dhawaanshaha ama fogaanta ilmuhu rabo. Waxaan rabaa inaan xiriir wanaagsan la yeesho carruurta. Ma doonayo in carruurtu iga baqaan, ay dareemaan ammaan-darro ama raaxo la'aan marka aan ag joogo.

6. Waxaan dareemayaa mas'uuliyadda carruurta. Haddii wanaagga ubadku ay khatar ku jirto, isla markiiba waxaan u sheegaa sarkaalka ilaalinta carruurta.

7. Kulamada kooxda iyo kormeerka, waxaan ka hadlayaa mawduucyada muhiimka ah si loo hubiyo in carruurta laga ilaaliyo rabshadaha. Tusaale ahaan: Waa sidee xiriirka carruurta? Intee in le'eg ayaa u dhowaanshaha iyo fogaanta wanaagsan tahay? Sidee buu xiriir ula leeyahay carruurta? Sidee caruurtu ula falgalaan warbaahinta? Waxaan si furan uga hadlaynaa hab-dhaqanka dhammaan shaqaalaha.

8. Haddii aan arko qof si xun ula dhaqmaya carruurta, si toos ah ayaan ula hadlayaa qofkaas. Iyada oo aan loo eegin in ay ahayd mid ula kac ah ama mid aan ula kac ahaynba, waxaan kala hadlayaa qofka. Haddii loo baahdo, waxaan kala hadli doonaa dadka kale ee mas'uulka ah. Goob kasta oo shaqo waa in laga hadlo khaladaadka. Haddii aanan hubin, waan kala hadlayaa dadka kale ama waxaan ogeysiiyaa u qaybsanaha ilaalinta carruurta.

Maxaa dhacaya haddii qof si aan habooneyn ula dhaqmo carruurta?

Diakonie waxaa ku sugan dad u xil saaran ilaalinta carruurta. Waxaan u baahanahay inaan la xiriiro qofka u qaybsan/u xilsaaran ilaalinta ilmaha haddii qof si isdaba joog ah ula dhaqmo ilmo si aan wanaagsaneyn. Masuuliyiinta ilaalinta carruurtu waxay kala tashadaan dadka kale waxa ay tahay inay sameeyaan marka xigta si loo hubiyo in ilmaha la ilaaliyo.

Haddii ubad uu si ula kac ah u dhaawaco qof kale, waa inaan isla markiiba caawiyaa ilmaha ama aan waco askarta. Haddii ilmaha laga taabto meelo gaar ah oo jirkiisa ah, waa inaan isla markiiba caawiyaa ilmaha ama aan wacaa askarta.

Haddii aan dareemo culays ama aanan hubin, waxaan waydiisanayaa caawinaad waqti fiican ama xilli ku haboon.

Haddii ubad si bareer/ula kac ah u dhaawacmo ama haddii ilmaha laga taabto meelaha gaarka ah, Diakonia waa in ay taas ku wargelisaa askarta.

Haddii aan ku xad-gudbo Siyaasadda Ilaalinta Ilmaha oo aan si khaldan ula dhaqmo carruurta, waxaa dhici karta:
• In aan bixiyo khasaaraha.
• In Diakonie ay diginin isiiso ama ay iga joojiso shaqadayda.
Markaan halkan saxeexo, waxaan xaqiijinayaa in aan helay siyaasadda ilaalinta carruurta.
• In aan si taxadar leh u akhriyay oo aan u fahmay xeerarka anshaxa.

Marka aan halkaan saxiixo, waxaan isku xilqaamayaa,

- In aan ku dhaqmo sida xeerkaan ku cad.
- In aan xeerka ku cad siyaasada ilaalinta si toos ah ugu dhaqmo.